

## Waxaad u baahantahay inaad ka ogaato adeegyada arrimaha bulshada

- 1- **Muhaajiriinta iyo dadka isdhiiba way heli karaan kaalamada SSI, TANF, FOOD STAMP iyo Maine Care-ka buuxa ( Full benefits from Maine Care ).** Taas waxay la micna tahay haddii aad dalbatay magangelyo aadna sugeyso go'aan, Islama markii aad hesho aqoonsigii magangalyo doonka ah waxaad xaq u leedahay inaad hesho prograamyadan.
  - 2- **Xaaladdaada qaxootinimo sidii ay doonto ha ahaatee, haddii aad si sharci ah ku deggentahay dalkan Mareekanka, waxaa laga yaabaa inaad hesho:**
    - Mucaawinada guud oo ee magaalada aad deggentahay bixiso;
    - SSI oo aad iskaga bixisid baahidaada joogtada ah, haddii da'daada ay ka weyntahay 65 amaba aad tahay ruux naafo ah iyo;
    - Maine Care aad ka faa'ideysan karto haddii aad tahay haween uur leh amaba da'daada ka yartahay 21 sano.
  - 3- **Dadkii uu qoyska ka koobnaa, baa qaarna heli karaan adeegyada bulshada qaarna waayi karaan iyagoo isku hal qoys isku ah . Tusaale, hooyada laga yaabee ineysan helin kaalamada Maine Care-ka, laakiin in ay carruurteeda u qalanto in ay helaan.** Taas micnaheedu waxay tahay inaad ka fekerto qoyskaada yaa u qalma Maine Care.
  - 4- **Qasab kuguma aha inaad tusto caddeen ku saabsan xaaladda qaxootinimo haddii aad u dalbaneyso caawinaad qof ka tirsan qoyskaada, oo aysan adiga ahayn.**
    - Haddii aad u dalbayso kaalmada ruux qoyskaada ka mid ah, waa inaad u sheegtaa Qofka kuu shaqeynaya ee DHHS-ta inaad adiga ahayn ruuxa aad wax u dalbayso.
    - Haddii aad sidaas u sheegtid, oo shaqaalaha ka socda DHHS uu ku weydiiyo caddeen amaba xaaladdaada qaxootinimo (Immigration Status), waxaad oran kartaa **Maya**.
- 5- Sharciga wuxuu qabaa haddii carruurtaa u qalmo in la caawiyo, waa inla caawiyo ilmahaas xitaa haddii aadan ka jawaabin su'aalaha ku saabsan xaaladdaada qaxootimadaada (Immigration Status).
- 6- **Haddii aadan wax caddeen ah oo qaxootinima aadan haysan ah waxaa laga yaabaa inaad mucaawino ka hesho prograamyada hoos ku qoran:**
    - Gar-gaar deg-dega ee caafimaad;
    - WIC (Cuntada loogu tala galay haweenka uurka leh iyo carruurta);
    - Qadada School-ka ee lacag la,aanta ah;
    - Tallaalka, baaridda iyo daweynta cudurada la kala qaado;
    - Dugsiyada Xanaanada iyo;
    - Shelterada (Guryaha)ay degaan dadka gurya la'aanta ah iyo qoysaska islaaya amaba isdila sheltarada la dejiyo (Guryaha).

### Wixii su'aal ah la xariir:

| <b>Maine Equal Justice Partners</b>                | <b>Immigrant Legal Advocacy Project (ILAP)</b>           |
|--|--|
| 207-626-7058 <b>or</b> toll-free at 1-866-626-7059 | 207-780-1593 <b>or</b> toll-free at 1-800-497-8505       |
| <a href="http://www.mejp.org">www.mejp.org</a>     | <a href="http://www.ilapmaine.org">www.ilapmaine.org</a> |

**Somali Culture and Development Tel:** 207-233-6014 ama 207-450-6035 [somaliculture2000@hotmail.com](mailto:somaliculture2000@hotmail.com)